



Warqada xaqiiqda-Macluumaadka guud (waxaa lagu helikaraa luuqado kale)

Waa maxey kansarka naasku?

Kansarka naasku waa ururka unugyo aan caadi aheyn ku waas oo sii wada koritaan iyo qaybsamid. Ugudambeyntana unugyadaasi waxey ku sameeyaan buro naaska ku sameysanta. Haddii aan kansarka laga saarin ama aan la xadeyn unugyada kansarku waxa ay ku fidi karaan jidhka qaybihiisa kale iyo ugudambeyntana waxay keeni kartaa dhimasho.

Ma khatarbaan ugu jiraa in leyga helo kansarka naaska?

Mid ka mid ah sideedii dumarka Ustereeliya waxa yeeshaan kansarka naasaha inta ay noolyihiin. **Khatarta ugu muhiimsan ee kansarka naasuhu waa in aad ahataa gabadh 50 sannadood jir ah ama ka weyn.**

Waa maxey baadhista maamagaram?

Baadhistaanka maamagaramku waa X-ray dhooskiisu hooseeyo oo naasaha dumarka la mariyo duramkaas oo haddii kale aan qabin naaso aan caadi aheyn ama badaleyn. Baadhista maamagaramku waxaa uu sheegaa 90% kansarka naasaha iyo helista kansarka naasaha ee aadka u yar in la dareemo. ***Goor hore in la ogaado ayaa badbaadadaadu ku jirtaa.*** Helista kansarka ee xiliyada hore waxa ay sare u qaadeysaa fursadaha lagu guuleysanayo daweyntiisa.

Intee goor ayaan u baahanahey in aan tago baadhista?

Si joogta ah labadii sannadooba baadhistaanka maamagaramka ayaa lagula taliyaa dumarka 50 sannadood jirka ah ama ka weyn. Hase ahaatee, xaaladaha qaarkood baadhis sannadkiiba ah ayaa laga yaabaa in lagula taliyo.

Baadhista maamagaramku ma lacag la'aan ah?

BaadhistaNaasaha ee WA (BreastScreen WA) waa hayad duwaladu dhaqaale siiso si ay u siiyaan baadhis maamagaram ah oo ***lacag la'aan ah*** dumarka da'doodu tahey 50 ilaa 69 sannadood. Duwmarka 40 ilaa 49 iyo kuwa da'doodu ka weyn tahay 70 sannadood waxey heli karaan badhitaan mamagaram ah oo bilaa lacag ah marka ay ka codsadaan BaadhistaNaasaha WA (BreastScreen WA). Baddhista mamagaramku ***KAMA JIRTO*** haya'da BaadhistaNaasaha ee WA (BreastScreen WA) dumarka da'doodu ka hooseyso 40 sannadood.

Halkee ayaan baadhistaanka mamogaramka ka sameysan karaa?

BaadhistaNaasaha WA (BreastScreen WA) waxey leedahey todoba adeegyada oo ku yaala magaalada gudaheeda Cannington, Fremantle, Joondalup, Midland, Mirrabooka, Perth City and Rockingham iyo afar khimadood oo wareega kuwaas oo booqda miyiga labadii sannadoodba mar.



Maxa dhacaya marka aan booqdo BaadhistaNaaska WA (BreastScreen WA)?

Marka aad timaadid khimada BaadhistaNaaska WA (BreastScreen WA) waxaa lagu talineyaa in ***aad xidhatid laba qurub oo dhar ah, sida jiibad ama surwaal iyo inaad sidoo kale iska ilaalisid in aad isticimaashid bootar ama cadarka dhididka.*** Marka aad timaadid BaadhistaNaaska WA (BreastScreen WA) habkan ayaa dhacaya:

1. Waa lagu soo dhaweyndoona waxaana lagu weydiindoona in aad buuxisid maclumaad shakhasi ah iyo foomka ogolaashaha.
2. Marka aad ku badelatid koodhka, gabadh raadiyoolajis ah ayaa ku geyndoonta qolka X-ray ga waxana ay ku weydiindoontaa su'aalo. Kadibna waxey kaa qaadidoontaa laba X-ray naaskiikastaba.
3. Waxaa lagu weydiindoona in aad sugtid inta raadiyoolojosku ka hubineyo tayada farsamo ee X-rayga.
4. Raadiyogarafig ayaa kuu sheegidoona marka baadhistu ay dhamaadka tahay ee aad tagi kartid.
5. X-raygaaga waxaa eegidoona ugu yaraan laba dhakhtar oo si gaar ah loo tababarey natiijadana waxa lagu soo direyaa mudo u dhexeysa 14 maalmaha oo ah maalmaha shaqada.
6. Ma'aha wax aan caadi aheyn in dumarka dib loogu yeedho si loo qaado X-ray dheraad ah. Haddii tani daruuri noqoto Kalkaalisada Qiimeynta Naaska ee BaadhistaNaaska WA (BreastScreen WA) ayaa telefoonka kaagala hadlidoona.

Sidee baa loo sameeyaa baadhista maamagaraamka ah?

Naaska waxaa si taxadar leh loo saaraa makiinada X-rayga (raajada) waxaana lagu riixaa ilaa dhowr ilbiriqsi inta X-rayga la qaadayo. Naas kasta waxaa laga qaadaa laba X-ray, mid dusha sare ah iyo mid dhinaca ah. Ku-riixiddu waxay noqon kartaa mid giigsan oo aan raaxo lahayn hase ahaatee xanuun ma leh, si kastaba ha ahaatee ku-riixiddu waa muhiim si loo qaado sawirka ugu waadaxsan oo suurtagalka ah (ka eeg muuqaalka dhanka midigta ee hoose) waxaana la isticmaalaa inta ugu yar ee shucaaca ah.



Haddii aan ku-riixid jirin x-raygaagu wuxuu noqonayaa mid aan si fiican u muuqan

Haddii ku-riixid jirto x-raygaagu wuxuu noqonayaa mid waadax ah

Maxaan u tagayaa baadhista maamagaraamka ah?

Ogaanshaha hore waa ilaalintaada.

Baadhista maamagaraamku waxay badbaadin kartaa nololshaada

Ballanta waxaa la samaysan karaa ayadoo la wacoyo 13 20 50.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan lacag la'aan ah, fadlan ka wac Haya'dda Translating and Interpreting Service (TIS) marka kowaad 13 14 50, waxaadna weydiisataa in lagugu xiro Baadista Naaska WA gaar ahaan adeegga dhexe ee ballan-samaynta 13 20 50.

Ballan-u-samaynta kooxda

Ballan-u-samaynta kooxda waxaa heli kara dumarka kuwaas oo doonaya inay ku yimaadaan koox ahaan. Tusaale ahaan, dumarka ku wada hadla isku luuqad, dumarka naadiyada ama ururada ama saaxiibada ah waxay ogaan karaan inay u dhib yar tahay inay ballanta samaystaan sidii ayagoo ah koox. Wixii su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan ballan-u-samaynta kooxda fadlan ka wac 13 20 50.

Ilaha macluumaadka oo lacag la'aanta ah

Waxaa jira dhowr faafis macluumaad ah oo lacag la'aan ah oo aad heli karto kuwaas oo ku saabsan baadhista naaska, kansarka naaska, dumarka leh taariikhda qoyska ee kansarka naaska, kuwa lays-geliyo, xanuunka naaska, dumarka laxaadka daran iyo waxyaalo kaleba. Si aad u dalbatid macluumaadkan, fadlan wac 9323 6762 ama u dir e-mail breastscreenwa@health.wa.gov.au

Ilaha macluumaadka oo luqadaha kale lagu heli karo

Fiidiyowga Aniga iyo Qoyskayga ('Me and My Family') Ilaha macluumaadka ku jira waxaa lagu heli karaa Arabic, Cantonese, Croatian, English, Greek, Italian, Khmer, Macedonian, Russian, Polish, Serbian, Spanish, Tagalog, Turkish, iyo Vietnamese.

Ilaha macluumaadka ee soo socda waxaa lagu heli karaa Ingiriisi, Arabic, Bosnia, Chinese, Croatia, Dari, Greek, Indonisi, Talyan, Macedoon, Malay, Bolish, Burtuqal, Seerbi, Spanish iyo Fietnamka.

- 'Fact Sheet - General Information' [Warqadda Xaqiiqda - Macluumaadka Guud']
- 'Screening Mammography for Women with a Family History of Breast Cancer' [Baadhista maamagaraamka ah ee dumarka leh taariikhda qoyska ee kansarka naaska]
- 'After your screening mammogram - What next?' [Ka dib baadhista maamagaraamka ah - maxaa ku xiga?]

Si aad u dalbatid macluumaadkan, fadlan wac 9323 6762 ama u dir e-mail

breastscreenwa@health.wa.gov.au

Helping Deliver a Healthy WA